



Macluumaaad cusub oo ku saabsan shaqaalaysiinta kormeeraha guud ee PPS

Ka socota Julia Brim-Edwards, Guddoomiyaha Kooxda Fulinta Shaqaalaysiinta

Guddiga Dugsiyada PPS iyo saddexda xubnaha guddiga cusub ee la doortay ayaa kulmay Juun 1 iyada oo qaata tallaaboooyin dhowr ah si loo bilaabo nidaamka shaqaalaysiinta ee kormeeraha guud ee cusub, waxaa ka mid ah:

- **Dib u eegid lagu sameeyay sharaxaada booska kormeeraha guud** si wanaagsan si loogu qeexo fursada kormeeraha guud ee cusub ee Portland. Sharaxaada booska oo kama dambays ah waxaa Isniinta laga heli doonaa website-ka PPS.
- **In la isku raacay Warbixinta Sharaxaada Hoggaanka oo dib eegid lagu sameeyo si ay uga turjunto nidaamka maalgelinta, xubnaha cusub ee guddiga iyo hantida PPS.**
- Iyada oo laga wada hadlay **wax ka bedel la taaban karo oo la xiriira raadinta shaqada adag ee raadinta**, oo ay ka mid tahay in la bedelo la taliyayaasha hoggaanka ee loo xilsaaray mashruuca, nidaamka baaritaanka taariikh dembiyeedka, iyo iyo wakhtiga wada xaajoodka heshiiska.
- **Dib u eegid lagu sameeyay heshiiska magdhowga ayaa la dhamaystiri doonaa iyada oo ay qiyaasta kala duwan ay tala ahaan ku soo jeedin doonaan Kooxda Hawl fulinta.**
- **Xubnaha guddiga oo laga cadsatay in sameeyaan talo soo jeedin ku saabsan musharixiinta u qalanta** ee la tixgelinayo; iyada oo lagu jiro wakhtigii dhammaadka ee sanad dugsiyeedka, Guddigu waxaa suurta gal ah in ay toddobaadyada soo socda wareystaan musharixiinta u qalanta haddii fursadu is keento.
- **Kooxda Hawl fulintu waxay sii wadi doontaa in ay wanaajiyaan nidaamka shaqaalaysiinta iyada oo la raacayo talo soo jeedinta Guddiga.**

Codsiga Taageerada ama Ogaysiiska Bulshada ee Kulamada Soo Socda:

- **Xubnaha bulshadu waxay musharixiinta u qalanta u soo jeedin karaan** Guddiga iyaga oo email u diriya PPS-Supt-Recruitment@pps.net. Fadlan soo raaci sharaxaad kooban oo ka hadlaysa qofka oo ay la socoto aqoonta uu leeyahay oo ah mid u dhiganta sharaxaada booska cusub looga baahan yahay.
- **Soo jeediya habab iyo siyaabo lagula xiriilo** Kooxda Fulinta si macluumaaadka iyo wakhtiyada kulanka loola wadaagi karo bulsho weyntra.
- **Kooxda Fulinta Shaqaalaysiinta Kormeeraha Guud waxay kulmi doonaa Talaadada, Juune 6** wakhtiga 4:00 galabnimo isaga oo ka dhacaya Qolka Shirarka ee Willamette, BESC, 501 N. Dixon St., Portland, OR 97227

- **Kulanka fulinta oo laga yaabo in uu dhaco toddobaadka soo socda ee loogu talagalay Guddiga PPS Board oo ay daba socota ogeysiin dadweyne oo rasmi ah.**